DAADADKA

Daad wuxuu dhacaa mar kasta oo ay biyo kacaan oo daboolaan dhul engegnaa.

Daadadku waa musiibooyinka dabiiciga ah kuwa ugu soo noqnoqosho badan uguna khasaare badan, marka la eego dhibka aadamiga ay u geystaan iyo cayrtaynta dadka. In u badan sida 90 boqolkiiba oo burburrada la xiriira musiibaadka dabiiciga ah (abaaraha ka sakow) ayaa daadadka ku tacalluqa.

Daadadku waxay leeyihiin sababo badan:

- Roobab culus, oo di'i kara dhawr beri ama roob karar ah oo socda muddo gaaban.
- Gu'ga oo barafku uu dhalaalo ama qashin iyo baraf xira farraq ama webiga marinkiisa oo markaa ku khasba in uu gebiyada jabsado oo ku fataho aagagga u dhaw.
- Gidaarka biyo-xidheen oo jaba. Iyadoo biyo-xidheenka qararka jabsada uusan inta badan dhicin, wuxuu noqon karaa khatar, gaar ahaan marka uu dhaco roob waqti dheer da'a, sidii ka dhacday Galbeedka-dhexe ee Maraykanka sanadkii 1993.
- Ciidda oo aan si fiican u muusinin biyaha ama ciiddoo kala tagsan. Marka dhulka kaymaha ahaa laga dhigo jidad iyo baarkinno, waxay carradu luminaysaa awooddii ay ku muusin lahayd biyaha roobka. Magaalaynta ayaa kordhisa qulqulka biyaha laba ilaa lix jeer sidii ay uga qulquli lahaayeen dhul caadi ah. Aagagga leh deegaan dhagaxyo leh, biyaha roobka iyo barafka dhalaalkiisaba laguma muusin karo. Natiijadu markaa waxay noqon kartaa daadad jil-qaad ah oo aan digniin lahayn ama ay yar tahayba.

Mid kasta oo sababahan ka mid ah waxaa lagu abla'ablayn karaa waxyaabo dhawr ah oo muhiim ah.

- Karar ahaanta biyaha da'aya oo ah celceliska roobka da'ay (oo inji saacaddiiba ah).
- Xilliga waa waqtiga u uu da'ayey roobku.
- Qaabaalka dhulka (Topography) waa sida guud ee ay u samaysan tahay dhulka oogadiisa, oo ay kana mid yihiin calaamadaha dabiiciga iyo kuwa dad-sameega ah.
- Xaaladda carrada waxaa ka mid ah nooca carrada (ciidda) cadadka qoyaanka ah eek u jira carrada, iyo cadadka carrada markii loo eego inta dhagax ah.
- Waxa ku dedan dhulka waxaa ka mid ah cawska iyo dedmada dad-sameega ah. Dhul caws badani ku dedan yahay wuxuu nuugi karaa caddad badan oo biyo ah. Dhulka ama xaaqan ama ay dhismayaashu ku dul yaallaan, wuxuu sababaa in ay biyuhu daadaan.

DAADADKA (WELI SOCDA)

Sababaha ay daadadku khatar caynkan ah u keenaan waxay yiiin in:

- Roob culusi uu xaaladda ku sii bi'in karo biyo xawli ku orda, muusid, iyo tallaabooyinka xakamaynta daadadka.
- Daadadka webiyada waxay ka yaabin karaan oo gaadi karaan magaalo ama meelaha ka hooseeya haddii uu jabo derbigii celinayey.
- Meelaha dhagaxyada leh,muusidda la'aanteeda ayaa sababi kara daadad.

Bohol kasta oo qubta biyo oo ku taal Maraykanka waxay leedahay babacyo biyaha ku soo daaya oo ku hareeraysan. Labada aag ee ay aad uga suuroggasho in ay daadad degdeg ah curiyaan waxay kala yihiin:

- Agaggaarka Webiga Mississippi.
- Dooxada dhexe ee California.

Inta badan meelaha kale ee Maraykanku waxaa laga yaabaa in uu daad heerar kala duwan ihi ka dhaco.

Aaggagga babac-daadeedka ahi waxay ku fidsan yihiin Koofurta Atlantic, Xeebta Gacanka (Gulf Coast) iyo bed-webiyeedyada Missouri iyo Arkansas.

Xusuusnow in ay jiraan ku dhawaad 4,000 oo umadood oo khatar ugu jirta in uu daad qarqiyo, waxaana halis ugu jira isla arrintaas ilaa 100 milyan oo dad ah.

Xeebaha lala xiriiriyo daadadka waa ay sii kordhayaan mar kasta oo laga shaqeeyo oo la banneeyo dhulal babacyada daadadka ahaa eek u yaal aagagga xeebaha. Sanad kasta khasaaraha ay daadadku ay keenaan waxaa ku baxda balaayiin dollar. Tobankii sano ee u dhexaysay 1992 ilaa 2001, daadadku waxay khasireen celceliska $4.1 bilyan sanadkii. Waqtiga dheer ee (1971 ilaa 2000) celceliska dadka daadadku ay dileen waa 127 sanadkii, inta bandanna daadadka xawliga ku socda ayaa dadkaa diley.

Daadaka waxaa lagu cabbiraa joogga ay biyuhu gaaraan. Weynaantoodana waxay ku salaysan tahay fursadda ay biyaha ku gaari karaan ama ku dhaafi karaan heer la yaqaanno iyagoo sidaa ku ekaanaya ee aan hos u dhacayn. Kala googgo'naanta saadaasha joogtannimada daadadka ayaa markaa loogu yeeraa aagagga halista.

DAADADKA (WELI SOCDA)

U DIYAARSANAANTA DAADADKA

Waxaa muhiim ah in:

- Ogow khatarta daad ee aagga ka jirta, oo ay ka mid tahay dallacnaaanta ka sarraysa heerka daadka iyo taariikhdii daadadka ee aagga.

- Diyaarso qorshe daad ka guurid ah, kuna tababbaro wadiiqada. Kala ogsoonow jidadka daadku ku butaaco iyo kuwa la mari karo. Qoyska gebigiis waa inuu ogaadaa meeshii ay aadi lahaayeen haddii ay noqoto in la guuro.

- Gal caymis daad haddii aad deggan tahay meel daadka u nugul (Aag Khatar Gooni ah ugu Jirta Daad). Caymiska noociisa mulkiilaha guri ee caadiga ah ma daboosho daad! La eeg magaalada ama degmada Khriidadaha Caddadka Caymiska Daadadka (FIRMs). Dabadeed, la fiiri wakiil caymis si aad u hesho caymis uu daboolo Barnaamijka Qaran ee Caymiska Daadadka (NFIP).

- Dikumiintiga muhiimka ah ha ku jireen santuug aysan biyuhu geli karayn. Dikumiintiyada inta badan maa la beddeli karaa, laakiin qaar baa beddelistooda ay ka adag tahay qaarka kale. Ku xafiddooda weel biyo (iyo dabba) aysan karinu waa qorshaha ugu nabadgelyo badan.

- La soco farriimaha musiibooyinka adigoo isticmaalaya raadiyowga la qaadan karo. Saraakiisha maxalliga ah iyo NWS ayaa joogteeya eegmooyinka iyo digniinaha markii ay muhiim noqdaan. Mar waliba dhegayso wararka markaa taagan.

Sida ugu fiican ee hantidaada looga ilaashado dhaawac daad waxaa weeye in laga fogaado dhisashada meel daad-mareen ah haddii aanu gurigaasi ahayn mid sare u qaadan tallaabooyin kale oo daadadka lagu xannibana aan la qaadin. Haddii guri jiray ku yaallo daad-mareen, waxaa jira tallaabooyin dhawr ah oo yareeya dhibta ku iman karta.

- Sare ugu qaad tinnaarka, biyaha, kululeeyaha, iyo sixniga korantada ilaa ugu yaraan hal fiid oo ka sarreeya heerka daad-mareenka (oo sidoo kale loo yaqaan Dallicidda Salka Daadka). Meelaha qaar, sare u qaadidda korantooyinkaa iyo yutiilitidaa waxay noqon kartaa saaridda meel sare ama meel sare oo isla dhismaha ah.

- Alaabta faraajiinta ah u dhaqaaji heer sare. Xitaa haddii uu dhuldhaca weyn ee gurigu dhaawac gaaro, u qaadidda faraajiinta iyo alaabaha kale waxay yaraynaysaa khasaaraha daadadka.

- Ku rakib qaadayaal sii qaada biyaha ku ururi kara meesha biyaha si ay uga ilaaliyaann biyaha daadka ah in ay isku ururisadaan meelaha biyaha lagu hooriyo ee majaroorrada hoostooda ah.

- Biyo ma galaan ka dhig dhuldhaca hoose iyo gidaarradaba si aad uga taxaddarto siimow ka soo baxa dildillaaca.

DAADADKA (WELI SOCDA)

Xaaladaha qaar, xitaa soo jeedinnadaani kuma fillaan doonaan in ay dhibka daadadka joojiyaan. Haddii aad ku nooshahay meel daad mareen ah, la tasho xirfadleyda dhismaha si aad u ogaato haddii ay la tahay in ay u baahan yihiin tallaabooyin kale oo khasaare yarayn ah (sida sare u dhisidda).

Haddii ay khasab noqoto in aad guurto, waa in aad:

- Ha ku socon, dabbaalan, gaari ku kaxaynin biyaha daadka ah dhexdooda. Baro oo ku tababbaro in aad gaari ku waddo meelaha daadadka markii ay jiraan gaadiidka lagu wado ee degaankaaga. Waxaa loo xushay in ay yihiin kuwo lagu badbaadi karo, waana meelaha ugu fiican ee looga fakan karo biyaha daadadka. Biyaha daadadka ahi waxay u dhaqaaqaan si dhaqso ah waxayna wadi karaan qashin sababi karo dhaawac. Xusuusnow 24 inji oo biyo ahi in ay gaari qaadi karaan, lix inji oo biyo daad ah oo xoog ku socdana ay qof kufin karaan.

- Ka dheerow buundooyinka dulmara biyo xawli ku socda. Biyaha xawliga ku socda wayba qaadi karaan buundooyinka iyadoo aanay ciduna ka digin, khaasatan markii ay biyuhu wadaan qashin culus.

- Ka fogow marinnada biyaha. Haddii aad gaari waddo oo aad ku soo baxdo gaari biyo aad u kacaya, noqo oo meel kale raadso. U dhaqaaq meel tag ah oo kana fog webiyada, ilaha biyaha wada, iyo farraqyada.

- U dhul lahaw xannibaadyada. Musiibada dadka waxka-qabta ee maxalliga ahi waxay xannibyo dhigaan meelaha daadad ka horreeyasi ay dadka ugu digaan ama ay baabuurta uga hagaan meesha meel nabdoonna u geeyaan. Abidkaa hayska garab marin xannib.

- Iska biyo-shubka iyo boholaha waraabinta. Marka uu daad jiro,biyo-shubka leh iyo boholaha waraabinta waxaa ka buuxsama biyo xawli ku socda. Ku socoshada ama dhex socoshada biyo-shubka ama boholaha waraabintu waa dariiqo la hubo in lagu bakhtiyo biyaha.

DAADADKA (WELI SOCDA)

Taxaddarrada la sameeyo daadadka ka dib.

- Ka dheerow aagagga butaacay. Aagagga butaacay meelo nabdoon maaha. Gelidda meel butaacday waxay adiga –iyo dadka damca in ay ku samatabixiyaanba- idin gelinaysaa khatar.

- Telefoonka keliya xaaladaha khatarta ah u hayso. Khadadka isgaarsiinta (kuwa guryaha iyo kuwa gacantaba) waxay noqonayaan mashquul markii uu daad dhaco ka dib. Wicid aan degdeg ahayn baa tii degdegga ahayd ka mashquulin karta telefoonka. Waxaa fiican in aan telefoonka la isticmaalin haddii aysan lagama maarmaan ahayn.

- Ha wadin gaari, haddii aanay jirin xaalad degdeg ah. Jidadka u daa gaadiidka ay tahay in ay qaadaan dadka iyo baabbuurta gurmadka.

[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]